


Dib Uga Eegida Wakhti Gelitaannada gudaha Bogga Intarneetka ee DirectMyCare


Waxaad adeegsan kartaa bogga internetka ee DirectMyCare si aad u eegto dhammaan wax gelitaanada waqtiga iyo masaafada mayl. Inkasta oo shaashaddaadu ay wax yar ka duwanaan karto tusaalaha lagu bixiyay hoose, tillaabooyinku waxay ahaanayaan kuwo isku mid ah.

Eegida Wax Gelitaanada Wakhti

1. Aad DirectMyCare.com oo gal bogga intarneetka adigoo gelinaya cinwaankaaga iimaylka iyo eray-sireedkaaga. Dooro **Log In (Gal)** oo waxaa lagu geyn doonaa bogga hore ee websaydka.
2. Dooro Time/Mileage Entry (Gelinta Wakhtiga/Masaafadda Mayl) si aad u eegto taariikh jadwaleedka iyo liisaska adeegyada (Jaantuska 01).
3. Gudaha shaashada xigta, waxaad isticmaali kartaa fallaadhaha si aad ugu eegto toddobaadyada soo socda ama kuwa lasoo dhaafay gudaha jadwal taariikheed si aad u doorato maalin, oo waxaadna isticmaali kartaa tusmada hoos u dhaadhaca si aad u doorato Time Entry (Gelinta Wakhtiga) ama Mileage Entry (Gelinta Masaafada Mayl) haddii la heli karo (Jaantuska 02).



Jaantuska 01




Jaantuska 02

Haddii aad heysato wax ka badan hal xulasho, isticmaal tusmooyinkan hoos u dhaadhac si aad u doorato nooca wax gelitaanka iyo qofka.

4. Kadib markaad doorato maalinta, waxaad arki doontaa liiska koodhahka adeegyada ee la heli karo. Dooro **View Entry (Eeg Wax gelitaanka)** ee ku xigta koodh kastoo adeeg si aad u aragto dhammaan waqtiyada la diiwaangeliyay toddobaadkaas. (Waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad hoos u dhaadhacdo si aad u aragto liiska oo dhammaystiran.)

Waxaad arki doontaa dhammaan gelinada shaqada ee toddobaadka ee adeeggaas, oo ay wehelinayaan xaaladda gelin-shaqeed kasta iyo wadarta guud ee saacadaha (Jaantuska 03).



Wadarta guud ee saacadaha ama masaafada mayl ee la diiwaangeliyey toddobaadkaas.

Dooro linkiga **VIEW (EEG)** si aad u eegto faahfaahint gelinka shaqada.

Jaantuska 03